# IPAD LOOGU TALAGALAY ARDAY KASTA OO DHIGTA SPPS: WAXA AAD U BAAHANTAHAY IN AAD OGAATO

## BUUGGA GACAN-QABSIGA EE ARDAYDA IYO QOYSASKA



# WAXYAABAHA UU BUUGGANI KA KOOBANYAHAY


**Hordhac** 4
- Waa Maxay Waxbarashada Shakhsigu? 4
- Maxaa Arday Walba Loo Siinayaa iPad? 4

**Asaaska iPad-Ka** 5
- Sidee Buu iPadku U Shaqeeyaa? 5
  - Xarkaha Iyo Fiilyoonka 5
- Ipadku Ma Wataa Qolof/Gal? 5
- Sideen U Daryeelaa Shaashada? 5
- Maxaan Ku Sameeyaa iPadka Marka Aanan Isticmaalaynin? 6
- Sidee Baan U Qaadaa iPad-Ka Marka Hawadu Xuntahay? 6

**Ilaalinta iPad-Ka** 7
- Ipadku Ma Ku Amaan Baa Iskuulka Gudihiisa? 7
- Macluumaadka Ku Jira iPadka Ma Ammaan Baa? 7

**Isticmaalka iPadka Ee Iskuulka Gudihiisa** 8
- Baytarigu Ma Buuxaa? 8
- Sideen U Keydiyaa Shaqada Aan Ku Samaysto iPad-Ka? 8
- Wax Maka Daabaci Karaa iPadka? 8
- Maxaa Dhacaya Haddii iPadka La Dayactirayo? 8
- Waxaan Leeyahay Mid Ii Gaar Ah. Ma Qasab Baa Inaan Isticmaalo iPadka Dugsiga? 8
- Ipadka Iyo Safarrada Waxbarasho 8

**Isticmaalka iPadka Marka Guriga La Joogo** 9

**Apps-Yada Ku Jira Ipadka** 9
- Apps-Yadee Ayaan Ku Shuban Karaa iPadkayga? 9
- Spps App Store: Qaabkee Lagu Xulaa Apps-Ka Ardaydu Isticmaalaan? 9
- Dib U Cusbooneynsiinta Software-Ka Iyo Nidaamyada 10
- Waxa iPadka Ku Jira Ma Aha Mid Gaar Loo Leeyahay 10
- Ku Samaynta Is-Bedel Aan La Ogoleyn Nidaamka Uu Ku Shaqeeyo iPad-Ka: iPad La Jabsady 10

**Sawirro, Iyo Macluumaad** 11
- Kaamerooyin Iyo Makarafoono 11
- Dhawaaqa, Muusiga Iyo Ciyaaraha 11

**Yididiilooyinka Isticmaalka Ipad-Ka** 12
- Khuseeya Ardayda 12
  - Isticmaal Mas'uuliyadaysan 12
  - Habdhaqan Iyo Isticmaal Aan La Aqbali Karin 12
- Khuseeya Waalidiinta Iyo Mas'uuliyiinta 12
  - Dajinta Nidaam/Qorshe 13
  - Maaraynta/Maamulidda Helitaanka 13
  - La Soco Horumarka Ardayga 13

**iPad Iyo Qalab La Halmaala Oo Ay Wax-Yeello Gaartay, Lumay Ama La Xaday** 14
- Apple Care+ 14
- Qalab La Dhaawacay Iyo Cillad Dhanka Farsamada 14
- iPad Iyo Qalabka La Halmaala Oo Lumay Ama La Xaday 14

**Cawaaqibta Ka Dhalan Karta Falal Aan Haboonayn Oo Lagu Fuliyo Ipadka** 15
- Cawaaqibta Ka Dhalan Karta iPad Lumay, La Xaday, Ama Ula Kac Loo Dhaacay 16
- Cawaaqibta ka dhalan karta iPadka iyo qalabkiisa oo la dhaawoco ama aan la soo celinin 16

**Heshiiska Isticmaalka Tignoolajiyada Ee Ardayda** 17

**Khayraadka Kale** 19
- Sharciyada Degmada Ee Ku Saabsan Tignoolajiyada 19
- Ilaha Laga Talo Qaatay 19

# HORDHAC

Waxaan ku faraxsanahay in aan siinayno iPad arday kasta oo dhigta Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul (SPPS). Waxaan aaminsanahay arday walba oo haysta iPad u gaar ah inay ka caawin doonto waxbarasho midda ugu fiican. Isla mar ahaantaa, ardaygu ku fiicnaan doono xirfadaha farsamada oo hadda ah mid aan laga maarmin dhinac kasta oo nolosha ah.

Ardaygaaga iPadkiisa wuxuu u furayaa fursado cusub oo ka caawisa waxbarashada.

Waxaa kale oo iPadkani idiin la imanayaa masuuliyado cusub oo muhiim ah adiga iyo ardaygaagaba.

Bogagga soo socda, waxaan ku soo bandhigaynaa ardaygaaga iPadkiisa, sharixi donaa sidii aad u daryeeli lahayd, ka jawaabi donaa qaar ka mid ah su'aalaha laga yaabaa in adiga iyo ardaygaagu qabtaan, Iiis garaneynaa sharciyada ugu muhiimsan iyo sida ugu ammaansan ee iPadka loo isticmaalo.

## WAA MAXAY WAXBARASHADA SHAKHSIGU?

**Waxbarashada shakhsiga ah waa geedi socod lagu ogaanayo sida ugu wanaagsan ee arday walba wax ku baran karo.** Ardayda qaar ayaa u baahan in ay maqlaan casharka in ka badan hal jeer. Kuwo kale waxay u baahan yihiin inay arkaan casharka. Mid ka mid ah ardayda waxaa laga yaabaa inuu diyaar u noqdo cashar sare iyadoo arday kalana oo fasalka la dhigta u baahdo in aad ku tababarto aasaaska hoose. Casharada ay la socdaan ardayga fakarkiisa, dhaqankiisa, ama luuqadiisa waxay uga dhigaan ardayga waxbarashada mid micno leh.

## MAXAA ARDAY WALBA LOO SIINAYAA IPAD?

**IPad waa qalab tignoolajiyad oo xoog badan.** Marka arday walba uu leeyahay iPad uu keligii isticmaali karo, qalabka wuxuu noqonayaa mid shaqsiyeed kulmin karana danahaaga shaqsiyeed iyo hanaankaaga waxbarasho.

iPadka waxaa la socda camera, internet wireless, word processor, iyo dhammaan noocyo kala duwan oo sofware ah si fududna loo isticmaalo oo loo yaqaano "apps". iPadka waxaa kale oo la socda laguna dhisay muuqaallo ka dhiga barashada mid fudud oo raaxo u leh qof kasta.

**Muhiim ma aha in Internet guriga kuugu jiro.** Wax kasta oo ardaygu u baahan yahay in iPadka u isticmaalo, wuxuu awoodaa inuu kusii shubto inta uu iskuulka joogo. iPadka si fudud ayaa loo qaadi karaa batarigiisuna wuxuu noolaan karaa muddo dheer, sidaa darteed waxbarashadu meel kasta ayay ka dhici kartaa.

## HELITAANKA IPAD-KA

iPadku waa hantida Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul. iPad-ka ardayda ayaa la amaahiyaa billowga sanad-dugsiyeedka si ay u isticmaalaan inta lagu jiro sanadka gudihiisa. Waaliddiintu waa inay soo saxiixaan heshiiska isticmaalka tignoolajiayada oo qeyb ka ah foomamka SPPS iUpdate ee sida tooska ah looga buuxiyo internet-ka marka lagu laabanayo iskuulka sanadka cusub. Ardayda dhigata iskuullada sare waa inay haystaan heshiiskan oo saxiixan inta ka horraysa bisha Sebteembar 30 si ugu suurto gasho inay iPad-ka guriga ugu qaataan.

## SOO CELINTA IPADKA

Ardayda horey u qalin jabisa, ka baxda, ama ka noqota Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul sababta ay dooni haa ahaatee waa inay soo celiyaan iPadka, galkiisa, dab qaadaha (charger), iyo fiiladiisa iyagoo ku sugan xaalad ay shaqeenayaan maalinta ay baxayaan ama ha kor.

## KA JOOJINTA ISTICMAALKA TIGNOOLAJIYADA

Sidoo kale waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan in ilmahooda laga joojiyo isticmaalka tignoolajida. Laakiin waalidiidku waa inuu ogaadaa ilmaha oo laga yareeyo ama laga joojiyo isticmaalka tignoolajiyada waxay sababi kartaa hoos u dhac ku yimaada ardayga dhinaca ka shaqaynta mashaariicda waxbarasho, iyadoo islamarkaana ku keenaysa dibudhac barashada isticmaalka tignoolajiyada dunidan xawliga ku socota. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan yareynta isticmaalka tignoolajiyada ee ardayga, fadlan la xiriir iskuulka ilmahaaga ama booqo spps.org/domain/12767.

# ASAASKA IPAD-KA

iPadku waa kombuyuutar yar oo shaashad leh. iPadku waa muhiim wuuna raagaa – marka la daryeelo wax badan ayaan kaaga sheegi doonaa isticmaalka iyo daryeelka iPadka. Fadlan akhri bogga soo socda haddii aad wax su aal ah qabtana la xiriir iskuulkaaga.

## SIDEE BUU IPADKU U SHAQEEYAA?

iPadku wuxuu ku shaqeeyaa batteri gudaha ah oo la buuxin karo. Isticmaal oo keliya (Apple wall charger) marka aad dab-qaadanaysid. Ardayda loo ogolyahay inay guryaha u qaataan ayaga ayaa ka musuul ah daryeelka iPadka iyo xarkihiisaba. Waa in la soo celiyaa iPadka dhammaadka sanaddugsiyeedka ama haddii ardaygu ka badasho dagmada.

## IPADKU MA WATAA QOLOF/GAL?

Haa. iPad kaaga waxaa la socda qolof/gal loogu tala galay in looga ilaaliyo dhibka ooga imaanaya isticmaalka maalin walba. Fadlan ku hay iPadka qolofka degmada iskuulku soo raacisay. Ha ka saarin ama tirtirin calaamadaha qoraalka ah ee degmada iskuulka soo saartay kuna yaalla iPadka ama qolofka. Sidoo kale, ha ku darin qoraal, sawiro, calaamado , ama farshaxan kale iPadka ama galka korkiisa.

Ardayda dhigata afasllada 6-12 waxay helayaan boorso wadata keyboard. Keyboard-ka waa laga fujin karaa boosada marka sawir lagu qaadayo iPad-ka. Ardaydu waa inay u daayaan inuu keyboard-ku ku dhaganadaa boorsada, gaar ahaan markay xareynayaan ee aysan isticmaalaynin iPad-ka.

Marka aadan isticmaalaynin iPadka, ku rid oo ku xir galkiisa si baytariga iyo shaashada uu dhib u soo gaarin.

## SIDEEN U DARYEELAA SHAASHADA?

Noqo mid u dabacsan iPad kaaga gaar ahaan shaashadda. Waa inaadan:



- Ku tiirsan shaashadda
- aadan iPadka dul-saarin buugaag ama waxyaabaha kale ee culus.
- aadan ku garaacin iPadka derbiyada, albaabada, dadka, ama waxyaabaha kale.
- aadan cabitaanno dul-saarin buug ama boorso iPadka ku dhex jiro.
- aadan isticmaalin waxyaabaha dadka muda si aysan shaashadda u xaganin una dhaawicin.
- aadan qalimaan ama qalin qori u isticmaalin shaashadda.
- aadan qolofka galinin wax aan iPadka ahayn.

### XARKAHA IYO FIILYOONKA

- Fadlan taxaddar marka aad xariga ama fiilooyin galinayso iPadka. Tani waxay ka hortagi doontaa in dhaawac soo gaaro.
- Xarkgaha ama fiilooyinka si xoog leh ha ku qasbin iPadka.
- iPadka u Isticmaal oo keliya adabtarada awoodda ee degmadu ogalaatay.
- Koollo "tape" si fudud loo saari karo ku calaamadee cable ka iyo adabtarada awood leh.
- Ha ku qorin calaamad joogto ah fiilooyinka ama adabtarada awooda leh korkooda.

Si loo ilaaliyo shaashada marka aad dhexmarayso hoolalka dugsiga, iPadka ku qaad xaga hore ee jirkaaga iskana ilaali inaad ku dhac-dhacdo ardayda kale.

Si aad u nadiifiso shaashadda isticmaal iPadka tirtirkiisa mid jilicsan, maro nadiif ah - qalayl ah, sida shukumaanka maacuunta lagu qallajiyo. Marna ha u isticmaalin tan daaqadhaha lagu nadiifiyo, kiimikada guryaha lagu nadiifiyo, (ammonia, alcohol) ama waxyaabaha alcohol - ku salaysan, waxay meesha ka saari karaan daaha muraayada iPadka gaarka ah/ama xagtin gaarsiin karaan shaashadda. Sidoo kale, ha isticmaalin hawo cadaadisa si aad u nadiifiso dekedaha (yar ee furan cidhifyada iPadka halkaas oo ay fiilooyinka ku xarig xirtaan).

# ASAASKA IPAD-KA

## MAXAAN KU SAMEEYAA IPADKA MARKA AANAN ISTICMAALAYNIN?

Ardayda fasallada PreK-5 waa inay ku ridaan iPadyadooda khaanadaha fasalkooda ee iskuulka. Ardayda fasallada 6 – 12 waa inay ku ridaan iPadyadooda sanduuq xiran marka aan lagu isticmaalaynin iskuulka dhexdiisa. Waxba dusha ha ka saarin iPadka marka uu sanduuqa ku jiro. Haddii qufulka sanduuqaagu jabanyahay, sida ugu dhaqsaha badan u war gali xafiiska iskuulka.

Ardayda loo ogolaaday inay iPadka guriga u qaataan (guud ahaan ardayda ku jirta sanad dugsiyeedka 6-12) waa inay maalin walba dugsiga ka dib iPadka u qaataan guryahooda.

Qalab kasta oo elektaroonik ah (iPad, telefoonada gacanta, iwm) waxay noqon karaan carqalad haddii aad loo isticmaalo ka hor wakhtiga jiifka. Si aad u dhafrin habeenkii, la soco waqtiyada aad iPadka isticmaashid, khubaradu waxay soo jeediyeen in qoysaska ay dhigtaan qalabka elektaroonigga qololka caadiga ah ee guriga ku dhex yaalla. Aqoonso meel dhexe oo guriga ka mid ah, halkaas oo ardaydu ku kaydsato kuna dab-siiso qalabka.



## SIDEE BAAN U QAADAA IPAD-KA MARKA HAWADU XUNTAHAY?

Cimilada ka ilaali iPadka. iPadka ka ilaali cimilada heerka kulka ee daran oo adigoo kuridaya galkiisa. Had iyo jeer waa inuu ku jiraa shandad ama boorso marka uu dibada yaalo, iyadoo keyboard-kuna ku dhagganyahay boorsaduna xirantahay. Sidoo kale:

- Ha ooga tagin iPad kaaga cimilada kulul oo ka karoysa 95 F
- Ha ooga tagin iPad kaaga cimilada qaboow ee ka hooseysa 32 F
- iPadka ka fogee biyaha iyo huurka (humidity) xad dhaafka ah

# ILAALINTA IPAD-KA

iPadku waa qalab aad u qiimo badan oo noqon kara mid bartilmaameed u ah xatooyo. Si aad u hubiso in aysan taasi dhicin:

- **MARNA CIDLO HA OOGA TAGIN IPADKA.**
- Ha ooga tagin ama ha ku kaydin iPadka baabuurka.
- Ha amaahinin iPadka qof kale. Adiga keliya ayaa mas'uul ka ah daryeelka iyo ammaanka iPad kaaga.
- Ha isticmaalin iPadka ama ha u ogolaan inuu noqdo mid la arki karo marka aad sugayso joogtana baska ama saldhigga tareenada; raacida gaadiidka dadweynaha, sida basaska Metro Transit ama Tareenka fudud; ama marka aad xaafada dhexdeeda lugaynayso.
- Dhex geli iPadka boorsada iskuulka marka aad u socotid ama aad ka imaanaysid iskuulka si aan loo arkin.
- PIN ama (Passcode) ayaa loo baahan doonaa si looga hortago qof aan loogu talagelin inuu isticmaalo iPad kaaga iyo macluumaadkaaga shakhsiyeed. Ha la wadaagin PIN kaaga cid kale.
- IPad kasta wuxuu leeyahay lambar aqoonsi ah iyo (tag) u gaar ah oo ah ay gacanta ku haynso degmadu. **Ha ka saarin taaga hana ka badelin lambarada.**

## IPADKU MA KU AMAAN BAA ISKUULKA GUDIHIISA?

Si looga hortago tuugada, marna ha uga tagin iPadka meel aan cid masuul ka ah joogin. Meelahaas waxaa ka mid ah fasallada xidhin, qolalka labiska, shaybaarka/qololka kombiyuutarada, xarumaha maktabada / warbaahinta, meelaha lagu cunteeyo/qolalka qadada, musqulaha, fasalada dhexdooda "hallways", ama meel kasta oo ku salaysan dugsiga, oo ay ku jiraan garoonnada ciyaaraha iyo xarumaha ciyaaraha.

iPadka ha kaga ka tagin meelaha la socdo ama dhulka, xitaa haddii ay tahay in bac ama boorsada uu ku dhex jiro. Waxaa dhici karta in lagu istaago oo waxyeelo la gaarsiiyo.

Ardayda fasalada 6-12: haddii aadan u baahneyn iPadka fasalka dhexdiisa, ama haddii macallinkaagu ku sheegay in aan la keenin iPadka fasalka, ku kaydi sanduuqa xiran "locked locker". Ha ooga tagin iPadka boorsada adiga oon la joogin. Mar kasta oo iPadka kaa fog yahay ama guriga kuu oolin ama sanduuqa xiran "locked locker" kuugu jirin, wuxuu halis u yahay in la xado.



## MACLUUMAADKA KU JIRA IPADKA MA AMMAAN BAA?

Aqoonsiyada dhinaca baraha internetka sida Apple IDs, cinwaanada e-mailka, iyo (usernames) iyo (passwords) ee nidaamka (online) iyo xisaabaadka, waa in loo isticmaalo ardayga oo kaliya oo waa in uu ahaado mid qarsoodi ah. Ku dar iPad kaaga PIN ama (passcode) si aad ooga hortagto dadka aan loogu taligelin inay isticmalaan qalabka arkaanna xogtaada, oo marna ha la wadaagin magacaaga iyo password-kaaga dadka kale. Sidoo kale ha isticmaalin (username) iyo (password) qofka kale.

# ISTICMAALKA IPADKA EE ISKUULKA GUDIHIISA

iPad kaaga waxaa loogu talagalay isticmaalka dugsiga, waa in la keeno dugsiga maalin walba isagoo leh bayteri buuxa. Ardaydu waa inay tagaan fasal walba iyagoo iPad kooda haysta, haddii aysan jirin in macalin gaar ah uu amray inay kasoo tagaan. Ardayda ayaa ka mas'uul ah inay dhamaystiraan shaqada koorsada, xitaa haddii iPadka guriga kaga yimaadaan.

### BAYTARIGU MA BUUXAA?

Ardayda iPadka guriga u qaata waa inay kula soo noqdaan dugsiga iPad kooda isagoo leh bayteri buuxa. Haddii aadan bayteriga buuxinin, waxaa laga yaabaa inaad awoodi waydo inaad ka qayb qaadato hawlaha waxbarashada fasalka.

## SIDEEN U KEYDIYAA SHAQADA AAN KU SAMAYSTO IPAD-KA?

Ardayda Dugsiyada Saint Paul waxay isticmaalaan nidaam ku shaqeeya internet-ka oo u sahalaya inay maamulaan shaqadooda islamarkaana ay keydsadaan ama soo gudbin karaan shaqada ay qabtaan.  Ardayda dugsiga sare waxay isticmaalaan Schoology, ardayda dugsiga hoosana waxay isticmaalaan Seesaw. Nidaamka loo yaqaano - learning management system (LMS) – waa nidaam ka caawinaya macallimiinta, ardayda iyo qoysaskuba inay wadaagaan hawlaha waxbarashada ee iskuulka. Nidaamknai wuxuu inaga caawinayaa inaan iPad-ka u isticmaalno si wanaagsan.

Dhammaan dukumiintiyada kale, waxaan ku talinaynaa inaad adigu email isugu dirto ama aad ku keydiso SPPS Apps/Google Drive for storage. Boos aad wax ku keydsato waad ka helaysaa iPad-ka, laakiin LAGUMA samaynayo waxa loo yaqaano (back up). Adiga ayay masuuliyad kaa saarantahay inaysan faylashu kaa lumin haddii uu iPad-ku kaa jabo ama ay si kadis ah wax kaaga masaxmaan. iPad-ka oo shaqayn waaya sabab uma noqonayso inaad soo gudbin weydo shaqada lagaa rabo.

## WAX MAKA DAABACI KARAA IPADKA?

Inkastoo ay suurogal tahay in wax laga daabaco iPadka, ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay isticmaalaan SPPS Apps/Google Drive si ay macalimiinta ula wadaagaan waraaqaha iyo faylasha mar kasta oo ay suuragal tahay. Tani waxay taageeraysaa diyaarinta ardeyga ee dhinaca jaamacadda/xirfadaha shaqooyinka iyo inay ka caawiso dugsiyada inaysa isticmaalin warqado badan.

## MAXAA DHACAYA HADDII IPADKA LA DAYACTIRAYO?

Ardaydu waxay heli doonaan ku meelgaar ama beddelaad marka iPadkii hore ee loo xilsaaray la dayactirayo. Haddii uu dib u dhaco iPadka bedelka ama ku meelgaarka ah, macallinku wuxuu u ogolaan karaa ardaygaa in shaqada casharkiisa iPad la'aan dhameystiran karo.

## WAXAAN LEEYAHAY MID II GAAR AH. MA QASAB BAA INAAN ISTICMAALO IPADKA DUGSIGA?

Haa. Ardayda waxaa loo baahan yahay inay isticmalaan iPadka dugsigu siiyey sababtoo ah waxaa la socda oo lagu shubi doonaa qalab waxbarasho oo u gaar ah waxbarashada fasalka.

## IPADKA IYO SAFARRADA WAXBARASHO

Ardaydu way la imin karaan iPadkooda SPPS safarada waxbarasho ee magalaada gudaheeda ah hadday macallinkooda fasax ka wataan.  Ardayda looma ogola inay la aadaan iPadkooda safar dheer haddii aysan haysanin fasax gooni ah oo u ogolaanaya. Xaaladahan oo kale marka lagu jiro, ardaydu iyaga ayaa ka masuul ah ammaanka iyo ilaalinta iPadkooda.

# ISTICMAALKA IPADKA MARKA GURIGA LA JOOGO

Ardayda fasallada 6-12 waxay awoodaan inay iPadka guriga u qaataan iyagoo u adeegsanaya ujeeddooyin waxbarasho. Dhamaan isticmaalka qalabka ay leedahay degmada - waa in la waafajiyaa tilmaamaha Isticmaalka Technology ee ku haboon Ardayda. Tilmaamaha ayaa laga heli karaa spps.org/pl/families

Ardayda wireless network way ku xiran karaan iPadka degmada siisay, laakiin isticmaalka oo dhan waa inay waafaqsan tahay nidaamka degmada.

# APPS-YADA KU JIRA IPADKA

## APPS-YADEE AYAAN KU SHUBAN KARAA IPADKAYGA?

Dhammaan apps-yada ku jira iPadka waa inay noqdaan kuwo uu tilmaamay sharciga degmada islamarkaana ku habboon ardayda. Ardayu waxay apps-yada ka soo rogan karaan SPPS custom App Store iyagoo adeegsanaya app-ka selfservice ee iPadkooda. Ardayda waxaa ka mamnuuc ah inay apps ku soo shubaan iPadka iyagoo ka soo qaadanaya app store-ka ama baraha kale. Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul ayaa xaq u leh inay ka saarto app aan habooneyn iyo/ama apps arday leeyahay oo laga yaabo inay isticmaasho buuxisana meel/boos qiimo leh oo hawlaha waxbarasho u baahanyihiin.

Ardayda ku shubta iPadkooda apps ay kasoo qaateen meelo ka geddisan SPPS app store waxay heli doonaan jawaab-celin dhinaca habdhaqanka ah sida uu qorayo Buugga Ardayda ee Xuquuqaha iyo Waajibaadka.

## SPPS APP STORE: QAABKEE LAGU XULAA APPS-KA ARDAYDU ISTICMAALAAN?

SPPS waxay ardayda u diyaarisay inay si fudud ku helaan boqolaal apps iyagoo usii maraya barta khaaska ah ee SPPS app store. Apps la ansixiyay:

- Waa kuwo hodan ku ah dhinaca xirfadaha waxbarshada
- Waxay ku habboonyihiin ardayda fasallada PreK-12
- Waa kuwo uu sahlanyahay isticmaalkoodu lana kontorooli karo
- Waa kuwo xayeysiiskoodu koobanyahay
- Waa kuwo la-falgali kara dhaqanka sinaanta jinsiyadaha ee SPPS
- Waa kuwo asturan islamarkaana xadidaya isticmaalka macluumaadka ardayda.

Liistada apps-ka iyo baraha ay degmadu ansixisey iyo shuruucdooda dhinaca asturitaanka macluumaadka waxaa laga heli karaa bartan: http://www.spps.org/personalizedlearning. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan apps-yadan iyo barahan, fadlan la xiriir Office of Teaching and Learning otl@spps.org.

# APPS-YADA KU JIRA IPADKA

## DIB U CUSBOONEYNSIINTA SOFTWARE-KA IYO NIDAAMYADA


Mararka qaarkood, apps iyo operating system waxay u baahan yihiin did-ucusbooneyn “updates” kasoo keena in iPadka iyo apps ka si sax ah iyo si ammaan ah u shaqeeyaan. Ardayda waxa laga filayaa inay raacaan tilmaamaha degmada marka ay ku rakibayaan/ xirayaan app iyo marka ay bid-ucusbooneyn “update” ku sameenayaan operating system-ka.

## WAXA IPADKA KU JIRA MA AHA MID GAAR LOO LEEYAHAY

iPads-ka waa hantida degmada. Xubnaha shaqaalaha SPPS waxay u fasax yihiin oo heli karaan taariikhda internetka, sawirada, iyo macluumaad kale oo ku saabsan iPadka wakhti kasta. Ardayda waxaa looga baahan yahay inuu furo iPadka waqti kaste ee shaqaalaha degmada codsadaan. Haddii aadan furin iPadka markii lagu weydiiyo, waxaa ka dhalanaysa cawaaqib “consequences” hab-dhaqanka ah iyadoo la raacayo Buugga Ardayda ee Xuquuqaha iyo Waajibaadka.

## KU SAMAYNTA IS-BEDEL AAN LA OGOLEYN NIDAAMKA UU KU SHAQEEYO IPAD-KA: IPAD LA JABSADY

Dhammaan iPad yada SPPS meel fog ayaa lagala soconayaa si loo hubiyo in goobaha ammaanka ee iPadyada aan la bedelin ama la tirtirin. Haddii arday uu dhex galo qaybaha gudaha “internal parts” ee iPadka ama uu wax ka bedalo goobaha amaanka, waxaa ka dhalanaysa cawaaqib “consequences” hab-dhaqanka ah iyadoo la raacayo Buugga Ardayda ee Xuquuqaha iyo Waajibaadka.





# SAWIRRO, IYO MACLUUMAAD

## KAAMEROOYIN IYO MAKARAFOONO

iPadku waxa uu leeyahay kaamirooyin hore iyo kuwo dambe iyo makarafoon ku dhex dhisan, si ardayda u qaadi karaan sawiro una duubi karaan maqal iyo muuqaal. Dhammaan waxa la duubo iyo sawirada lagu qaado iPadka waxay hoos yimaadaan kuna xiran yihiin siyaasadaha “policies” SPPS iyo sidoo kale sharciyada gobolka iyo federaalka. waxaad sawiri kartaa ama cod duubi kartaa ama muuqaal sameyn kartaa inta aad dugsiga joogto macalin ama maamulaha dugsiga kuu ogalaaday adigoo u adeegsanaya dhinaca waxbarashada dugsiga. Marna qof kale ha sawirin, hana ka duubin muuqaal, ama maqal qofkaas oon ogeyn ama ku siin ogolaansho shaqsiyeed.

- **Isticmaalka qalabka elektarooniga ah iyo kaamirooyinka waa ka mamnuuc qolalka labiska iyo musqulaha.**
- Ha u isticmaalin kaamirada sawiro ama fiidiyow aan habooneyn “explicit photos”.
- Ha u isticmaalin kaamirada inaad sawiro qaas ah isaga qaadid ama aad la qaybsatid macluumaadkaaga shaqsi kale.
- Ha u isticmaalin kaamirada ama makarafoonka inaad ku ceebeyso, ku maagto, ama ku dhibto/hanjabto qof kale hab kasta.
- Ha u dirin email, ha gelin internet-ka, ama si elektaroonig ha u dirin sawir, fiidiyow, ama cajalado maqal ah oo ah shakhsiyaad kale iyagoon oggolaansho qoraal ah ku siin.



## DHAWAAQA, MUUSIGA IYO CIYAARAHA

Dhawaaqa iPadka waa in uu xiranaado/aamusnaado waqtiyada oo dhan, haddii macallinka kuu ogolaado waad ka saari kartaa aamusnaanta adigoo u adeegsanaya hawsha fasalka. Macalinkaaga ayaa sidoo kale ku siin kara ogolaansho aad ku isticmaali karto dhago-gufeys “earbuds” ama samaacado dhegaha “earphones”. Haddii ay taasi dhacdo, hubi in maqalka iPadku hooseeyo si aan qofka kuu dhow u maqlin karin.

# YIDIDIILOOYINKA ISTICMAALKA IPAD-KA

iPadku wuxuu nogon karaa qalab waxbarasho oo cajiib ah. SPPS waxay ku faraxsan tahay in ay awoodaan in ay siiyaan arday kasta iPad loo isticmaalo dugsiga. mas'uuliyad ayaa la socota isticmaalka iPadka, isticmaalka qaar ka mid ah lama ogola.

## KHUSEEYA ARDAYDA - ISTICMAAL MAS'UULIYADAYSAN

Ardaydu waxay isticmaali karaan khayraadka technolojiyada ee degmada si ay u abuuraan faylasha iyo mashaariicda shaqada dugsiga la xiriira, cilmi baaris, iyo qorshaynta kuliyadeed iyo shaqada mustaqbalka. Ardaydu waa inay:

- Raacaan dhamaan siyaasadaha "policies" degmada iyo fasalka, nidaamka iyo tilmaamaha marka la isticmaalayo farsamada "technology".
- Si qaas ah u haystaan username iyo password ka.
- Ula dhaqmaan dadka kale ixtiraam, isticmaalaan luuqada ku haboon marka ay elektaroonik ahaan ula dhaqmayaan dadke kale.
- Isla markiiba u sheegan macallin ama dadka waaweyn ee shaqaalaha ah haddii ay helaan war elektaroonik ah ama isgaarsiin ah taasoo ka dhigaysa in uu dhibsan, ama haddii ay si qalad ah u helaan waxyaabo aan habooneyn, sawiro, video, ama bogagga "websites" internetka.
- Ixtiraam shaqada iyo hantida aqooneed ee xuquuqda dadka kale, oo aan si ula kac ah aad nuqulka "copy" sameyn, dhaawaca gaarsiin, ama aadan tirtirin shaqo qof kale leeyahay. Ardaydu waxay si sax ah u xusi doonaan ilaha marka ay isticmaalaan macluumaad qofkale, sawirada, warbaahinta, ama shaqo kale oo mashaariicda iyo hawlaha iyaga u gaarka ah.
- Ixtiraam amaanada gaarka "privacy" ah ee dadka kale. Ardayda waa inay ku xadidaan sawirada, video iyo duubista codka dugsiga/iskuulka dhexdiisa iyagoo u isticmaalaya dhinaca waxbarasho.

## HABDHAQAN IYO ISTICMAAL AAN LA AQBALI KARIN

Ardaydu uma isticmaali karaan kheyraadka tignoolajiyada ee degmada si ay:

- U helaan, abuuraan, ama u faafiyaan hadal been ah ama khaldan; ama dhibaan, waxyeelaan ama maagaan dad kale.
- U dhex galaan kheyraadka farsama "technology" degmada iyadoon loo fasaxin ama aan habooneyn.
- Isticmaal, dib u soo ceshad, kaydin, ama dirid luqad aan habboonayn, sawiro, ama waxyaalaha kale ee digitalka ku dhex jira.
- Khayaameeyn, oo ay ku jiraan helida ama bixinta su'aalaha iyo jawaabaha imtixaanka: raadiya iyo/ama nuqul "copy" ka sameeya jawaabo ama macluumaad ku saabsan internetka ama khayraadka kale ee elektaroonigga ku yaal ama in kheyraadka teknoolaji kasta ama qalabka; nuqul "copy" ka sameeya siina gudbiya macluumaad qof kale ama shaqo iyaga u gaar ah; ama sameeyo noocyo kale oo la mid ah oo qish ah ee elektaroonigga ah.
- Xadgudub ku sameeya heshiisyada copyright ama liisan yada.
- U dhex galaan kheyraad aan habooneyn ama laga xannibmay ee cayn kasta ah iyadoo la joogo deegaanka- degmada "district property" iyo xilliga dugsiga
- Faafiya ama qora xog kasta oo shakhsi ah keentana in lagu aqoonsan karo naftiisa ama dad kale, kana caawin karta qof kale inuu helo sugnaantiisa ama lasoo xiriir karo. Waxaa ka mid ah waxyaabahaas sida e - mail address, magacaaga oo buuxa , cinwaanka guriga ama dugsiga, lambarka telefoonka, waalidka ama mas'uulka magacyadooda, ama magaca dugsiga.
- Dib u habeyn operating system, ka saarin ammaanka profile kiisa ama ay kharribaan khayraadka "technology" degmada.
- Ugu soo shubaan iPadkooda apps aynan Dugsiyada Dadweynaha ee saint Paul ogolayn

# YIDIDIILOOYINKA ISTICMAALKA IPAD-KA



## KHUSEEYA WAALIDIINTA IYO MAS'UULIYIINTA

Iyadoo la tixraacayo SPPS Isticmaalka Heshiiska Technology Ardayda, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ayaa masuul ka ah la socodka isticmaalka ilmahaaga ee internetka iyo in ay helaan kheyraadka teknoolajiga degmada oo ay ku jiraan iPadka, degmada waxay sameysay email account, meel loogu talagalay barashada oo online ah, qalabka lakaashado, iyo khayraadka waxbarasho. Waalidka iyo mas'uuliyiinta waa in ay dejiyaan rajada "expectations" cad oo ku aaddan isticmaalka habboon ee qalabka elektarooniga ah iyo inay xaddidaan helitaanka qalabka saacadaha dugsi aan la joogin. Haddii ilmahaagu uusan la soconayn xeerarkaaga , waxaad xaq u leedahay inaad xaddido helitaanka/isticmaalka qalabka guriga dhexdiisa. Xogta hoose ayaa waxaa loogu tala galay in ay kaa caawiyaan sidii aad u dejin lahay rajada "expectations" cad iyo sidaad ku ilaalin lahayd isticmaalka qalabkooda.

### DAJINTA NIDAAM/QORSHE

S i cad oo qeexan u dhig una gaarsii ilmahaaga waxa aad ka rajaynayso dhinaca isticmaalka iPadka. Heshiiska Caadiga ee Warbaahinta Qoyska "The Common Sense Media Family Agreement" wuxuu bixiyaa liiska warbixin kuna habboon da'da loo isticmaali karo in lagu hogaamiyo sheekaysiga ilmahaaga ee ku saabsan isticmaalka mas'uuliyada ku dheehan ee warbaahinta iyo farsamada. Waxaa laga heli karaa http://goo.gl/Q9Ysbu.

### KORMEERKA IYO XADDIDA WAQTIGA SHAASHADDA

IPadku waa qalab muhiim ah oo wax lagu barto, awoodna u leh in loo isticmaalo waqti-lumis. dadka waaweyn oo Kormeera iyo qaabka loo isticmaalo oo cad ayaa muhiim ah.

- Ilmahaagu ha ku isticmaaleen qalabka guriga meeshiisa dhexe, sida qolka jikada ama kuwa fadhiga, si aad si fudud ula socon kartid una maarayn kartid isticmaalkooda.
- Samee qorshe "expectations" in ilmahaagu marka hore dhamaystiraan casharadooda iyo hawlahooda ka hor inta aysan qalabka u isticmaalin internet-ka, ciyaaraha, ama dhegaysiga musikada.

### MAARAYNTA/MAAMULIDDA HELITAANKA

Marka iPadku uu yaallo dugsiga kuna jiro network-ga degmada internet kiisa waa la sifeeyey, waxyaalaha aan habboonayn waa laga xannibay iyadoo la raacayo shuruucda Children's Internet Protection Act (CIPA), ayaa adkayn doono in la boodo baraha aan habboonayn. In kastoo aysan qalabkan shaandhayntu dammaanad buuxda ka qaadi karini xannibaada dhammaan baraha aan habboonayn, macallimiinta iyo shaqaalaha iskuullada ayaa ku dadaallaya inay kormeeran lana socdaan isticmaalka internetka ee ardayda inta ay joogaan iskuulka gudihiisa.

SPPS waxay hirgaliyeen qalab cusub oo shaandheeya internet-ka oo loo yaqaano iBoss, qalabkan oo xannibaya booqashada baraha aan habboonayn xitaa haddii uusan iPad-ku ku xirnayn Khadka iskuullada, ee uu ku xiranyahay khadadka dadweynaha sida WIFI iwl. Arrintani waxay ardayda ka xannibaysa inay booqdaan baraha aan habboonayn iyo kuwa bulshada sida Facebook, Snapchat ama Instagram. Dhammaan waxyaabaha soo gala ama ka baxa qalabka SPPS waa la kantooralayaa, laakiin qalabka iBoss wax saamayn ah kuma yeelanayo qalabka kale ee guriga yaalla ama xarumaha dadweynaha. Waalidka ayaa laga rabaa inay la socdaan waxyaabaha lagu daawado qalabkaas.

### LA SOCO HORUMARKA ARDAYGA

SPPS waxay ku boorinayaan waalidka iyo mas'uulka inay isticmaalaan iPadka si ay ula socdaan horumarka waxbarasho ee ilmahooda iyo ulana xiriiraan si elektaroonig ah macallinta ilmahooda. Waydii ardaydaadu inay kuu muujiyaan wixii ay soo barteen iyo waxay ku abuureen "created" iPadka, kalana hadal sida ay u isticmaalaan qalabka dugsiga dhexdiisa.

Baraha Infinite Campus Mobile App iyo Schoology App ayay waalidiintu isticmaali karaan si ay u la socdaan shaqada iyo natiijooyinka ardaydooda. Fadlan kala xiriir iskuulka ilmahaaga wixii faahfaahin ah.

<u>Xiriirka Email-ka</u>

Waalidku sidoo kale wuxuu isticmaali karaa Safari browser app iyaga oo furanaya email shakhsi ah si ay email ooga soo diraan macallinka ilmahooda. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waa in aysan Mail app ku jira iPadka ku xirin/darin email kooda shaqsiga ah sababtoo ah waxaa laga yaabaa in emailada shaqsi ah ay arkaan qof kasta oo gacanta ku dhiga iPadka.

# IPAD IYO QALAB LA HALMAALA OO AY WAX-YEELLO GAARTAY, LUMAY AMA LA XADAY

## DARYEELKA APPLE+

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan isticmaalka iPadkaaga, xidhiidhiyaha shabakadaha wireless, ama ku saabsan isticmaalka barnaamijyadooda Apple - ku tilmaamay sida Keynote, Numbers, ama Pages, la xiriir lambarka telefoonka AppleCare ee ku yaalla kaarka ku dhegan iPad kaaga dhabarkiisa. Taageerada AppleCare waxaa la heli karaa Isniin – Jimce 6 a.m. - 8 p.m. iyo 8 a.m. - 8 p.m. on Sabti/Axad.

## QALAB LA DHAAWACAY IYO CILLAD DHANKA FARSAMADA

Ha isku dayin in aad dhex gashid qalabka korontada ee gudaha ama dayactir ku sameysid iPadka. Haddii iPadku uu shaqeyn waayo ama waxyeello soo gaadho, la xiriir shaqaalaha macallinkaaga ama shaqaalaha dugsiga si loogu sheegto dhibaatada Desk Service sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah. fursadaha dayactir / bedelka iPadka waxaa go'aamin doona shaqaalaha jooga Service Desk. Haddii iPadku muujiyo dhibaatooyin farsamo saacadaha ka baxsan dugsiga, waxaad u baahan doontaa inaad sugtid ilaa aad kusoo noqonaysid dugsiga si ay u sheegtid.



## IPAD IYO QALABKA LA HALMAALA OO LUMAY AMA LA XADAY

Haddii iPadka uu lumo ama la xado, u sheeg xafiiska weyn ee iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Shaqaalaha dugsiga ayaa kaa caawin doonaa sidii waxbixin loogu gudbin lahaa Desk Service.

Ardayda horey u qalin jabisa, ka baxa, laga eryo, ama laga joojiyo diiwaangelinta Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul sababta ay doonayso ha ahaatee, waa inay iPadka ku soo celiyaan degmada isagoo wata, qoloftiisa, keyboad-kiisa (ardayda fasalka 6-12), iyo xarig yadiisa iyagoo ku sugan xaalad ay shaqeyn karaan xafiiska weyn ee ay dugsiga ama ka hor taariikhda bixitaankooda. Ka gaabinta soo celinta hantida degmada ama bixinta tii luntay, la xaday, ama waxyeello gaartay, waxay keeni kartaa in tallaabo sharci ah la qaado iyadoo la cuskanayo qodobka 506.02 Magdhawga Handtida Iskuulka.

Hadii uu ardaygu lumiyo galka iPad-ka ama fiilada dabka, ardayga iyo qoyskiisa ayaa ka mas'uul ah in ay soo gadaan mid qalabkii oo kale ah oo ah nooca Apple ay iibiyaan. Hadii kale waa in ay qiimaha lacagta ee uu qalabku u dhigmo keenaan.

# CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA FALAL AAN HABOONAYN OO LAGU FULIYO IPADKA



Buugga gacan-qabsiga ee SPPS ee ay ku qoran yihiin xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha saaran ardayda ayaa qeexaya talaabada laga qaadaya ardayda sameeya falal aan haboonayn. Qaanuunkaas ayaa sidoo kale loo cuskanayaa haddii uu ardaygu iPad-ka u adeegsado in uu ku gaysto fal dambiyeed.

Ardayda dhammaan waxay fursad u helayaan in ay iPad-ka isticmaalaan saacadaha iskuulka iyaga oo taageera ka helaya waaxda personalised learning. Ardayda qaar ayaa waxaa loo ogolanaayaa in ay iPad-ka guryahooda u qaataan. Tani waxay ku xiran tahay da'da ardayga iyo baahidiisa waxbarasho. Ardaygii iPad-ka u adeegsada siyaabo ka horimanaya qaanuunka SPPS, waxaa laga qaadayaa talaabooyin lagaga xadidaya iPad-ka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu la kulmo ciqaabo kale oo ku aadan fal-dambiyeedka uu gaystay oo ay ka mid yihiin in lagu amro in uu qaato casharro ku saabsan isticmaalka iPad-ka.

Sida ku cad buugga xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha ardayda, in uu ardaygu qaabab aysan degmada ogolayn u adeegsado adeegyada tiknoolajiyada sida email-ada iyo internet-ka, ayuu ardayga ku mutaysanayaa ciqaabo ay ka mid yihiin in iPad-ka laga xayiro ama lagaba qaado iyo in loo diido in uu guriga u qaato, ciqaabaha lagu xusay qawaaniinta degmada ama ciqaabta ku haabon dambiga uu geystay.

**Xadgudubyada Heerka 1-aad**
Eedeymaha la xiriiro xadgubyada heerka 1-aad waxaa xalinaya shaqaalaha iskuulka hadii uu ardaygu horey u gaysanin xadgudubyo waaweyn.  Shaqaalaha waxay ardayga u sheegayaan qaabka haboon ee loo isticmaalo iPad-ka si uu ardygu u noqdo mid muujiya dhaqan waangsan, aamin ah oo ay xushmad ku jirto.

Xadgubyada heerka 1-aad waxaa ka mid ah:

- In aad iPadka iyo apps-yada u adeegsatid waxyaabo aanan waxbarashada ku saabsanayn
- iPad-ka oo aadan ka taxadarin
- Kamerada iPad-ka oo aad ku qaadid sawirro qof kale asaga oo aanan kuu idmin
- In aad dokumenti dad kale aad soo rogotid adiga oo aanan laguu idmin
- Qash ama si xun u adeegsiga shaqada dad kale oo aad internetka kala soo baxdid.

**Xadgudubyada Heerka 2-aad**
Xadgubyada heerka 2-aad waxaa loo xil saaray shaqaalaha maamulka ee iskuulka. Talaabooyinka lagu qaadayo xadgubyada noocan ah waxaa looga dan leeyahay in ardayga la dareensiiyo baaxadda falka uu gaystay isla markaasna lagu saxo khaladaadkii uu sameeyay.

Ogow:  Haddii uu ardaygu gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisu soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabyada xadgubta heerka sare.

Xadgubyada heerka 2-aad waxaa ka mid ah:

- In uu ardaygu marar badan gaysto falal soo noqnoqda
- In uu daabaco ama diro qoraallo ama fariimo aanan haboonayn oo dad kale wax u dhimi kara
- In uu si sharci daro ah ku bedelo qaabka uu iPad-ku u shaqeeyo (operating system).

# CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA FALAL AAN HABOONAYN OO LAGU FULIYO IPADKA

**Xadgudubyada Heerka 3-aad**
Xadgudubyada heerka 3-aad waxaa laga yaabaa in uu ardaygu ku mutaysto in galin ama maalin idil iskuulka laga diro. Ogow: Hadii uu ardayga gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisa soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabta xadgubuyada heerka sare.

Xadgubyada heerka 3-aad waxaa ka mid ah:

- In si qasid ah loo dhawaco iPad-ka
- In marar badan iPad-ka loo adeegsado xoogsheegasho, qish ama
- Falal kale oo ka hor-imanaya nidaamka degmada ee ku saabsan adeegsiga tiknoolajiyada

**Xadgudubyada Heerka 4-aad**
Xadgudubyada heerka 4-aad wuxuu ardayga ku mutaystaa in si ku meel gaar ah iskuulka looga ceyriyo.Waxaa sidoo kale laga yaabaa in booliiska lagu wargaliyo falka xadgudubka. Ganaaxa uu ardayga mutaysanayo waa in ardayga iskuulka laga ceyriyaa maalin wax ka badan. Ogow:  Hadii uu ardayga gaysto fal aad u culus ama ay xadgudubyadiisa soo noq-noqdaan, wuxuu mutaysan karaa in markaasi lagu qaado ciqaabyada xadgubuyada heerka sare.  Xadgudubyada  heerka 4-aad waxaa ka mid ah in uu ardayga raadiyo ama galo macluumaad aana haboonayn ama in uu dhaawac u gaysto qalabka tiknoolajiyada iyo diwaannada degmada.

## CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA IPAD LUMAY, LA XADAY, AMA ULA KAC LOO DHAACAY

Hadii uu ardayga lumiyo, laga xado ama si ula kac ah u dhaawaco iPad-ka, ciqaabta uu mutaysanayo waxaa ka mid ah in loo diido in uu iPad-ka guriga u qaato iyo in uu qaato casharro dheeraad ah oo ku saabsan habsami u adeegsiga iPad-ka, ama jawaab-celin kale oo lagu saleynayo Buugga Xuquuqda iyo waajibaadka ee Ardayda. Sababaha uu ardayga ciqaabahaas ku mutaysan karo waxaa ka mid shaashad ku jabaytay si ula kac ahna loo tuuray ama daadinta iPad-ka; lulid bac ama boorso uu iPad-ku ku dhex jiro; ula kac qalabka loogu daadiyo dareere “liquid; ama In shay kale lagu garaaco qalabka; waxyeelada soo gaadho qalabka oonan ku jirin galkiisii; ama samaynta beddelka aan la ogalayn ee operating system ka, oo loo yaqaan jabsiga qalabka. Waxa kale oo ka mid ah khasaaraha ama waxyeelada gaara cable danabka - ee - USB, adabtarada awood 12W, iyo qolofkooda.

## CAWAAQIBTA KA DHALAN KARTA IPADKA IYO QALABKIISA OO LA DHAAWOCO AMA AAN LA SOO CELININ

Haddii ardaygu ku guuldaraysto inuu soo celiyo iPadka dhamaadka sanad dugsiyeedka, ama xiliga uu iskuulka ka wareegayo, qoyska ardayga laga waxaa yaabaa in lagu qabsado qiimaha buuxa ee badalka iPadka sida waafaqsan Habka 506.02 “Compensation for Lost and Damaged District Property” - Magdhawga hantida degmada ee la lumiyay ama la wax yeeleeyay. Marka aad soo celinyso iPadka waa in aad la soo celisaa adabtarada degmada - siiyaa awood iyo filloyinka danabka - ee - USB Haddii ardayga soo celin waayo iPad-ka, galkiisa, fiilada korontada ama haddii uu soo dhaawaco wuxuu ku mutaysanayaa inuu bixiyo qiimaha lacageed ee lagu badalayo shaygaas. Fadlan, kala shaqee iskuulka ilmahaaga wixii kharash lacageed ah ee ku kacaya badalida waxyaabaha dhawaacmay.

# HESHIISKA ISTICMAALKA TIGNOOLAJIYADA EE ARDAYDA

Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay ardayda siiyaan fursad u sahlaysa in ay tignoolajiyada casriga ah (technology) u adeegsadaan waxbarshada. Ardayda waxaa laga rabaa in ay raacaan ooy ilaaliyaan qawaaniinta iyo xeerarka maamulka degmada, shuruucda kale ee wehelisa, iyo nidaamka si ay usii helaan fursada adeegsiga tignoolajiyada. Shuruucda iyo nidaamyada khuseeya hawshan waxay ku lifaaqanyihiin bartan spps.org/ personalizedlearning, iyadoo waliba isla bartan laga heli karo macluumaadka ay qoysasku u baahanyihiin.

## HESHIISKA ARDAYGA

### WAXAAN NOQONAYAA QOF MAS'UUL AH

- Mar walba iPad-kayga waxaan ku kaydsanayaa galka uu iskuulku isiiyay, waxaana ka dhowrayaa inaan wax ku kor qoro ama ku dhajiyo waraaqo iyo koollo ama (stickers).
- Khuseeya ardayda fasallada 6-12, marka aana iPadka isticmaalaynin, wuxuu ku xirnaanayaa boorsada iyadoo (keyboard) – kuna ku dhagganaanayo iPad-ka.
- Warqada calaamadda ah ay degmada ku dhajisay iPad-ka sida qoaalka magacayga ah, halkeeda ayaan u dhaafayaa oo ma goynayo.
- Waan xifdinayaa iPad-kayga, waxaan ku nadiifinayaa ama aan ku tirtirayaa kaliya maro qalalan, waxaana dhigayaa meel aan aad u kululayn ama qaboobayn.
- Waxaan la soconayaa oon ogaanayaa goobta uu iPadkaygu mar walba ku suganyahay.
- Waxaan hubinayaa in mar walba baytariga iPadku kaarikaysanyahay.
- Waxaan ku isticmaali doonaa iPad-kayga nidaamka ay Degamdu u dajisay oo kaliya
- Tignoolajiyada uma isticmaali doono qaab aan ku dhex galo macluud aanay Dagmadu ogolayn ama aan habboonayn.
- Waxaan u hoggaansamayaa shuruucda nuqul-guurinta (copyright).
- Uma isticmaalayo ilaha tignoolajiyada ee dagmada inaan ku khiyaameeyo imtixaanada.

### WAXAAN NOQONAYAA QOF AMMAAN AH

- Haddii aan iPad-ka u qaato guriga, waxaan ku ridayaa boorsadayda inta aan usii socda iskuulka ama aan kasoo socdo, inta aan saarnahay baska, tareenka amaba aan joogo boostaajada.
- Waxaan ilaashanayaa macluumaadkayga gaarka ah, oo ay ka mid yihiin magaca iyo lambarka sirta ah, lama wadaagyo macluumaadkan cid kale.
- Haddii la'ila soo sameeyo xiriir dhinaca tignoolajiyada ah oo aan ka shakiyo, ama aan si lama filaan ah u dhex-galo baro aan munaasab ahayn, sida fiidiyow iyo sawiro waxaan isla-markiiba war-galinayaa macallinka ama qof kale oo masuul ah.

### WAXAAN NOQONAYAA QOF IXTIRAAM LEH

- Waxaan isticmaalayaa luqada ku habboon iskuulka, waxaana u isticmaali doonaa qalabka degmada si la oggolyahay marka aan duubayo fiidiyow ama aan sawir qaadayo.
- Waxaan daalacanaayaa ama aan sii faafinayaa macluumaadka sharciga ah, runta ah, ee waliba aan dhibaato iyo af-lagaado ku ahayn dadka midabada iyo jinsiyada kala duwan.
- iPad-kayga uma isticmaalayo inaan ku hujuumo, ku dhibaateeyo, hagardaamo ku geysto, ama aan ku faafiyo been ama warbixin qaldan oo ku saabsan dadka kale.
- Ka hor inta aanan dadka sawir ka qaadin ama fiidiyow ka duubin ama aanan sii gudbinin, waxaan weydiisanayaa fasax, marnaba kuma isticmaalaya kaameerada meelaha gaarka loo leeyahay.

**Ardayda:** Saxiixaygu wuxuu caddayn u yahay inaan waafaqsanahay macluumaadka kor ku qoran. Waxaan ogahay isticmaalkayga qalabka iyo tignoolajiyada degmadu inuu yahay wax aan waayi karo. Waxaan fahamsanahay haddii aan raaci waayo shuruudaha u yaalla isticmaalka tignoolajiyada inay ka dhalan karto in tallabo la iga qaado.

**Magaca Ardayga:** ______________________ **ID-ga Ardayga:**______________

**Saxiixa Ardayga:** ______________________ **Taariikhda:**______________

SAMPLE

SAMPLE

# HESHIISKA ISTICMAALKA TIGNOOLAJIYADA EE ARDAYDA

## MACLUUMAADKA WAALIDIINTA/MASULLIYIINTA

**Arjiyada iyo Adeegyada ku dhisan baraha-interneedka**
Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay isticmaalaan nidaamka apps-ka iyo adeegyada ku salysan internetka oo ay ka shaqayso qolo kale, nidaamkan oo u sahalaya ardayda xiriirka khadka interneedka iyo qalabka wadashaqaynta, iyo hawlaha kale ee waxbarasho. Maamulka Dagmadu wuxuu qandaraas ku siiyay hawshan inay qabtaan dhowr shirkadood oo gacanta ku haya macluumaadkan. Macluumaadka waxaa masuul ka ah iskana leh SPPS laakiin waxaa ka shaqeeynaya qolo kale oo qandaraas lagu siiyey.

SPPS waxay sidoo kale isticmaashaa apps iyo baraha internet-ka oo dheeraad ah si loo taagero qaababka waxbaridda. Barnaamijyadan qaarkood waxay u baahanyihiin in lagu galo magac/lamar sir ah si ay ardaydu usii wataan wixii ay ka shaqaynayeen saacadihii hore. Macluumaadkan gaarka ah waxay ku koobanyihiin oo kaliya magaca/lambarka sirta ah iyo shaqada uu ardaygu xilligaa gacanta ku hayo.
Diwaanka apps-ka ay Degmadu ogoshahay in la isticmaalo iyo waliba siyaasadahooda asturidda macluumaadka waxaad ka heli kartaa bartan spps.org/personalizedlearning. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan apps-yadan waxaa loo soo gudbin karaa: otl@spps.org ama 651.767.8139.

**Shaandhaynta Internetka**
Dagmadu waxay ardayda siinaysaa fursad ay ku heli karaan ilo waxbarasho iyagoo adeegsanaya internetka. Dagmadu waxay isticmaalaysaa tignoolajiyad kala shaandhaysa internetka si looga baaqsado in ardaydu ay booqdaan baro aan haboonayn islamarkaana loogu hogaansamo sharciga internetka ee dhinaca caruurta ee Children's Internet Protection Act (CIPA). Nidaamkani wuxuu oggolaanayaa in si ammaan ah lagu isticmaalo qalabka SPPS marka ay ardaydu joogaan iskuulka. Sidoo kale, nidaamku wuxuu ilaaliyaa qalabka SPPS marka lagu isticmaalayo khadadka ka baxsan SPPS ee sida kuwa dadweynaha ama xaafadaha.

Inta ay ardayda banaanka ka joogaan iskuulka, waalidiinta ayaa masuul ka ah inay siiyaan tilmaamo ku saabsan isticmaalka internetka, si lamid ah sida ay u siiyaan tilmaaha ku saabsan isticmaalka talefishinka, raadiyaha, daawashada filimaanta iyo waxyaabaha kale ee aan haboonayn. Waalidiinta ayaa ka masuul ah inay ilaaliyaan lana socdaan isticmaalka internet-ka iyo qalabka degmada ee ilmahooda.

**Xuquuqda Waalidiinta iyo Masu'uuliyiinta**
Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay mar kasta ooy doonaan ay fiirin karaan macluumaadka electronic-ga ah iyo email-ka ilmahooda. Waalidku wuxuu xq u leeyahay inuu codsn karo macluumaadka ilmhiisa ee ku saabsan isticmaalka tignoolajiyada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan foomka ilmaha lagaga joojiyo isticmaalka tignoolajiyada (Opt-Out-Form) la xiriir iskuulka ilmahaaga ama booqo it.spps.org/policies/guidelines-for-acceptable-use.

**Waalidka / Masuulka:** Saxiixaygu wuxuu caddayn u yahay inaan dib-u-eegid ku sameeyay macluumaadkan, una ogaaladay in ilmahaygu isticmaali karo iPad, ilaha tignoolajiyada ee degmada iyo waliba internet-ka. Waxaan sidoo kale fahamsanahay inaan wakhti kasta dib uga noqon karo fasaxan aan ilmahayga siiyay anigoo qoraal soo gudbinaya.

**Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka:** ______________________________ **Taariikhda:**__________________

SAMPLE

# KHAYRAADKA KALE

## SHARCIYADA DEGMADA EE KU SAABSAN TIGNOOLAJIYADA

Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul waxay bixiyaan helitaanka khayraadka degmada ee tignoolajiyada ah loona isticmaalayo ujeeddooyin waxbarasho . Helitaankaasi waxaa laga yaabaa in dib loo ceshado waqti kasta oo dhaqanka xad gudub ama habdhaqan aan habboonayn uu yimaado kaasoo la xiriira isticmaalka khayraadka tignoolajiyada degmada.

Haddii la raaci waayo siyaasadaha ama tilmaamaha Degmada ee dukumentigan ku qoran si loo daryeelko iyo si loo isticmaalo iPadka, taasi waxay keeni kartaa in la waayo mudnaanta gaarka ee la idinku siiyey iPadka. Isticmaal walba dhamaan waa in la waafajiyaa siyaasadaha “policies” soo socda:

- Siyaasadda 501 Mamnuucidda Dhibaatooyinka
- Siyaasadda 505 Mamnuucidda Xoogsheegadka
- Siyaadadda 520 Isticmaalka iyo Dhaqaalaynta Tignoolajiyada
- Tilmaamaha Isticmaalka Habboon ee Technology ee Ardayda
- Siyaasadda 506 Anshaxa Ardayga
- Buugga Xuquuqda iyo Waajibaadka

Dhammaan sharciyadan waxaa laga daalacan karaa barta internetka ee ah: boe.spps.org/SECTION_V_STUDENTS2.

IPadka waa hanti ah ay leeyihiin Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul sidaa darteed waxaa la awoodaa in hubin iyo dib u eegid lagu sameyn karo waqti kasta.

## ILAHA LAGA TALO QAATAY

Intii lagu jiray diyaarinta buuggan, Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay la tashatay baro internet, Tilmaame- barayaal, iyo shaqaale ka kala yimid degmooyinka socda:

Becker Public Schools
Farmington Area Public Schools
Hopkins Schools
Minneapolis Public Schools
Minnetonka Public Schools
South Washington County Schools
Spring Lake Park Schools

Saint Paul
Public Schools
A World of Opportunities

360 Colborne Street, Saint Paul, Minnesota 55102 | personalizedlearning.spps.org